

Xiliyada aanu furan nahay iyo Wakhtiyada

Waxa aanu furan nahay maalin kasta 08.00 ilaa 17.50, isla markaana waa furan nahay xataa fasaxa samaha. Laakiin waani xidhan nahay maalmaha bank holidays-ka, iyo maalmaha Kirismaska iyo Sanadka Cusub.

Xiliyadu waa wakhtiyadan:

Xiliyada Subaxii	Xiliyada Galabtii
08.00 – 12.50	13.00 – 16.50
09.00 – 12.50	13.00 – 17.50

Maciiumaadka Xiriirka

Cinwaankanagu waa:

Easton Community Children's Centre
Russell Town Avenue
Easton, Bristol
BS5 9JF

Telefoonka: 0117 939 2550

Fax-ka: 0117 939 2551

Email-ka: enquiries@eastonccc.org.uk

Web: www.eastonccc.org.uk



Xanaanada Xarumaheedu waa 3:

* **Tiny Tots: Laga bilaalo 6 bilood – 2 sano**

Waxa ay Tiny Tots higsanaysaa in aad ke hesho bay'ad bad-qabta oo nashadaad iyo kobcin leh, una qalanta kal-gacalka iyo daryeelka ay caruurta ku qabto guriga. Waana ogsoonahay in wakhtiganu yahay mid muhiim u ah oo kobcin badan. Waxana aanu mar kasta isku daynaa in aanu waalidiinta halkan Tiny Tots ugu soo dhawayno si diiran.

* **Sunshine: Caruurta jirta 2-sano**

Waxa kaliya ee aad u baahan tahay in aad nala joogto mudo gaaban si aad u aragto qosolka iyo kal-gacalka Sunshine, waxana uu ilmahaagu ku sugnaan doonaa bay'ad kal-gacal iyo koriimo leh! Waxana aanu isticmaalnaa khibradanaga horumarinta caruurta, in aanu u fidino madadaalo, nashadaad iyo barasho dhisan.

* **Rainbow: Caruurta jirta 3 & 4 sano**

Rainbow waxa ay muhiimada siisaa madadaalada, isla markaana in aanu ogaano ilmahaaga. Waxana aanu ku han-weynahay in aanu hubino in maalin waliba noqoto maalin uu ilmahu waayo-aragnimo ku cusub oo niyadsan helo, isla markaana u suurto galinaysa in caruurta u kuur-galaan, isla markaana raacdaan waxa ay xiisaynayaan. Nashadaadkuna waxa ay caruurta u suurto galiyaan horumarinta xirfadahooda bulsho, nafsiyeed, isla markaana u diyaariyaan dugsiiga.

U dabaaldega Bulshadeena!

Waxaanu danaynaa isku-dhafnaanta, sinaanta iyo weliba kala duwnaanshaha. Sida aad arki doonto marka aad soo booqato Xarunta, waxa caruurta ay ka kala yimaadaan qoysas kala duwan; kuna kala duwan xaga jinsiyada, luqadaha, awoodooda laxaadka iyo garaadkoodaba, iyo weliba qaabka qoysaska ay ka kala yimaadaan. Hadaba caruurta ku kala duwan xaga karaanka, luqada iyo weliba dhaqanku waxa ay kala bartaan waxyaabo fara badan, isla markaana waayo-aragnimadooda ayaa horumarta. Waxana aanu siinaa cuntooyin kala duwan, ku heesnaa heeso, kuna cayarnaa gaymisyo ka kala yimid dhamaan aduunka dacadadiisa!



Jadwalka Barashada

Ilmahaaga waxa loo samayn doonaa Jadwalkiisa Barashada oo u gaar ah, kaasi oo tusmo u noqonaya sahankiisa barasho ee mudada uu ku jiro xaruntan. Waxana ilmahaaga Jadwalkiisa Barashada ku jiri doona fiirsashadiisa, sawiradiisa iyo tusaalayaal hawlaha uu qabto. Waxana tani ay inoo wada saamaxaysaa in aynu la wadaagno, isla markaana dib u jeleeci karno ilmo kasta horumarkiisa iyo guusha ay ka gaadhaan xaga guriga iyo xaga xarunta xanaanadaba.

Jadwalka Barashada waxa aad mar kasta ka helayso qolka, isla markaana waxa aanu jecel nahay in aad adna ku biiriso waxa aad ka ku darayso iyo weliba sawiro. Waxana aanu rajaynaynaa in marka ilmahaagu dhameeyo xanaanada in aad qaadan doonto Jadwalka Barashada oo uu kuu noqon doono qaniimad ku xasuusisa sanadaha hore ee ilmahaaga ee qaaliga ahaa.



Hanaanka Shaqsi-masuul (Key-worker-ka)

Waxa aanu ogsoon nahay in bilaabitaanka xanaanadu noqon karo xili xaasaasi ah, sidaa awadeed waxa aanu hubinaa in uu ilmo kasta yeesho shaqsi-masuula oo adiga iyo ilmahaagaba ka kaalmeyn kara la qabsiga iyo fahanka bay'adan xanaanada.



Sahanka Barashada ee Ilmahaaga

Dhamaan dhinacyada aanu u qorshayno barashada iyo horumarka ilmahu waxa uu ku salaysan yahay haykalka loo yaqaano 'Early Years Foundation Stage' iyo lixda dhinac ee barashada;

- * Xiriirka, Luqada and Qoraalka
- * Jirka (Physical)
- * Xalinta Mushkiladaha, Sababaynta iyo Xisaabinta
- * Abuurka Aragtida (Creative)
- * Aqoonta iyo Fahanka Aduunka
- * Shaxsinimada Bulshanimo iyo xaga Nafsiyanka.



Xanaano caruureedka iyo tacliinta dhalaanka oo tayo sare leh sanadka oo dhan oo aad ka helayso magaalada badhtamaheeda.

Waanu jecel nahay waxaanu qabano, adigana sidoo kale!